



## Ardaydu waxa ay soo bandhigeen fikirka dhir beerista magaalada

Ardayda fasalada kala duwan ee labaad iyo saddexaad waxa ay ka qeybqaateen maalintii Valentine Day in ay beeraan shan geed oo cusub nawaaxiga iskuulka. Geedaha waxa iskuulka ugu soo deeqay Waaxda Goobaha Lagu Madadaaloodo/Jardiinooyinka iyo Abuurka Dhirta iyo Ilaalinta Maalgalinta.

“Higsigayagu waxa weeye in aan gaarno sanadkii tiro arday ah oo dhan 500,” ayey tiri Dina Drake, oo u shaqeysay Waaxda Dhirta iyo Daaqa ee magaalada oo xiriirineysay beeritaanka dhirta. “Marka aad aragto caruur yar yar oo caawineysa sidii ay ugu soo bandhigi lahaayeen geedo dunida taasi oo ay hore uga fikirin waxa ay tahay mid xiiso weyn leh.”

Mararka qaarkood ardaydu waxa ay aad ugu farxeen geedaha ay beerayaan inay u bixiyaan marka ay beeraan magacooda. Iskuul ayaa wuxuu u bixiyey geedihii ay beeraan Rajo iyo Nabad. Mid ka mid ah geedaha lagu beeray iskuulka Rigler ayaa waxaa loo bixiyey Sherman Scooter oo macallimad wax ka dhigta iyo aygeedii.

Sanad-dugsiyeedkan waxaa jadwalka Dugsiyada Dadweynaha Portland ku jirta sidii geedo looga beeri lahaa iskuulo dhowra oo kale.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa kala fiirisaa shabakadan magaalada Portland ee [urban forestry webpage](#).

*-Pamela Jordan*